



Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay tusaale u noqdeen dadaalkii lagu caawinayey iskuulada Houston iyo Miami

Ka bacdi burburkii duufaanaadii ku dhacay Iskuulada Houston iyo Miami, Dugsiyada Dadweynaha Portland iyaga oo hoggaaminaya bulsho weynta waxay dadaal u galeen sidii loo caawin lahaa ardeyda , qoysaska iyo shaqaalaha waxbarashada labadaasi magaalo.

Mashruuca Sii Rajo, waxa uu soconayaan 6 maalmood sidii loo ururin lahaa caawimo dhinaca agabka ardeydu u baahan yihiin sida, kabo iyo sharabaad, iyo sidoo kale gargaar dhaqaale oo la siinayo dadweynaha labadaas magaalo.

Caawimada waxaa loo diri doonaa Dugsiyada Dadweynaha Degmooyinka Houston Independent School District iyo Miami-Dade County. Labadaas Dugsi degmo oo aad u ballaaran waxaa wax ka barta oo ay u addeegaan ardey ay tiradoodu dhan tahay 563,000.

“Waxa aanu garab taaganahay saaxiibadayada ardeyda iyo macalimiinta waqtigan adag ee ay iminka ku jiraan,” sidaasi waxaa yiri Guadalupe Guerrero, oo ah guddoomiyaha waxbarashada cusub ee Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS). “Waxa aan ka warqabnaa in ardey fara badan iyo qoysaskoodu ay ka luntay degganaanshihii gurigoodu. Iskuulada iyo ganacsigii labadaasi magaalo iyadana raad buu ku yeeshay duufaanku iyo daadkii. Haddii aanu nahay bulshada Portland, waxa aanu jecelahay in aanu qabano wixii gargaar ah ee aan ku xaqiijineyno in wax lagaga qabto baahida degdeg ah, anaka oo rajeyneyna sidii loo soo celin lahaa in diirada la saaro barashadii iyo baristii sida ugu dhakhsaha badan.”

Dugsiyada Degmadu waxa ay heleen tiro saaxiibo oo hawlgalkan kala qeybqaata kuwaasi oo kala ah: Portland Association of Teachers, Starbucks, On Point Community Credit Union, I Heart Radio, iyo KOIN6.

Dadaalka dhaqaale ururinta waxa la qaban doonaa inta u dhaxaysa bishan Sebtember 25 ilaa 30 keeda. Dadka raba inay gargaar ka geystaan waxa ay ku bixin karaa labadan goobood oo kala ah makhaayadaha bunka lagu cabo ee magaaladan Portland ee la yiraa Starbucks iyo Baananka ay leeyihiih Bulshada ee la yiraa On Point.

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo sida gargaarka loo bixinayo , waxaa booqataa shabakada Project Giving Hope oo ku yaal bogga PPS. Waa kan meesha aad ka geleysaa:

www.pps.net/givinghope.